**GOLAHA WAKIILADA JSL**

# WARBIXINTA KORMEERKA XILDHIBAANADA GOBOLKA SANAAG EE WADA TASHIGA ARIMAHA DEEGAANKA




Submitted Date by:________________________________________________________________

## 1. HORDHAC

Taariikhdu markay ahad 23/04/2012 ayaa waxaa socdaal qaatay muddo lix cisho ah ugu anbabaxay Gobolka **Sanaag** koox xildhibaano ah oo ay horkacayaan Guddida Deegaanka iyo Khayraadka dabiiciga ah ee Golaha Wakiilada JSL,kormeerkan ayaa waxaa uu daba socday kormeero ka ka horeeyey oo ay kooxo xildhibaano ahi kusoo mareen Gobolada Awdal iyo Sool kaas oo ujeedadiisu ahayd u kuurgalka xaalada deegaan ee ka jirta taas oo ay xildhibaanadu indhahooda kusoo arkayeen dhulkaas iyo xaaladiisa sidii ay ugu dabakhi lahaayeen wixii uga soo baxa xeerar ay gacanta ku hayaan kuwaas oo kala ah.

- National Environment Act (Xeerka Guud ee Deegaanka)
- Wildlife and Forestry Act (Xeerka kaymaha iyo Duurjoogta)
- Solid Waste Management Act (Xeerka Qashinka Adkaha ah)

Hadaba kormeerkan Gobolka Sanaag ayaa xildhibaanada u baxay waxaa ay tiradoodu ahayd afar xildhibaan kuwaas oo u badnaa xildhibaanadii laga soo doortay Gobolka Sanaag kana mid ahaa Kooxda Aragti Wadaagta Deegaanka ee Golaha wakiilada ama (Green Cocus Team), kooxdan oo ku midaysan sidii ay aragti midaysan uga yeelan lahaayeen Badbaadinta deegaanka.

Sidii Gobalada Awdal iyo Sool waxaa sidoo kale kormeerkan taageereysey Hay'ada IRI taas oo xildhibaanda u fududaysay inay deegaanka baaxadaa leh maraan.
Socdaalkan loogu kuur galaayey xaaladda deegaan ee Gobolka Sanaag ayaa waxaa uu ka bilawday magaalada lagu magacaabo Badweyn halkaas oo ay xildhibaanadu waraysi la yeesheen dadkii halkaas degenaa,waxa ay xildhibaanadu socdaal kusoo mareen deegaan balaadhan oo ka tirsan gobolkan baaxada weyn ee Sanaag waxaana Dhulkaas kamid ahaa Gawsa-weyne, Fadhigaab,Ceel-midgaan,Gar-adag,Ceel-afweyn,Darara-weyne,Cali-xaydh,Goof,Daallo iyo dhulkale oo badan.
Hadii aan is bar-bar dhigno xaalada deegaan ee Gobolka Sanaag iyo Goboladii kale ee xildhibaanadu soo mareen ee kala ahaa Awdal iyo Sool waxaa halkaas kaaga soo baxaysa inuu gobolkani yahay Gobolka ugu dhuxulaysiga badan iyada oo aanu

dhuxushii ugu horeysey ee iyada oo baxaysa indhahayagu qabtaan ku aragnay deegaanka Darara-weyne.

Gebe gebadii waxaa ay xildhibaanadu kulan balaadhan la yeeshaan buldhada qaybaheeda kala duwan ee magaalada Ceerigaabo kuwaas oo ka waramay su'aalona ka weydiiyey xildhibaanada Sadexda xeer ee aan kor ku sheegnay wixii aragti ah ee ay kusoo darayeena kusoo daray,kulankan ayaa waxaa sii qaban qaabiyey intii xildhibaanadu ay kor meerayeen deegaanada miyiga ah qaar kamida shaqaalaha Hay'ada IRI iyo Golaha wakiilada halkaas oo xildhibaanadu ku balan qaadeen sidii ay ugu guntan laaheen wax ka qabashada deegaanka sii nabaad guuraya iyaga oo ku xalin doona xeerar ay u sameeyaan.




## 2. UJEEDOOYINKA KORMEERKA

Ujeeddada kormeerkan balaadhan ee Xildhibaanadu ku tageen ayaa wuxuu ahaa ama salka ku hayey:-

1. U kuur galka ama xogogaal u noqoshada xaalada Gobolka Sanaag gaar ahaan Nabaad-guurka,Xaalufinta, Garaacista,Dhuxulaysiga iyo dabar-goynta dhirta iyo ugaadha lagu hayo.
2. Saamaynta dhaqan-dhaqaale ee ay yeelatay kadib markii ay arimahas aan sare kusoo sheegnay dheceen iyo sidii wax looga qaban lahaa shacab iyo dawladba.
3. Wadatashiga Deegaan ee guud ahaan dadka ku nool Miyi,Tuulo iyo Magaaloba taasoo ay xildhibaanadu fekedehooda ka dhegeysteen in ka badan 100 qof oo ku nool deeggaanka Gobolka Sanaag.
4. U goggol xaadhida iyo in loo helo aragti midaysan oo ka timid qaybaha kala duwan ee bulshada ku kala nool Gobolada ay ka koobantahay Jamhuuriyada Somaliland taas oo lagu saleeyo sadex Xeer oo Xildhibaanadu gacanta ku hayaan kuwaas oo kala ah:

    - National Environment Act (Xeerka Guud ee Deegaanka)
    - Wildlife and Forestry Act (Xeerka kaymaha iyo Duurjoogta)
    - Solid Waste Management Act (Xeerka Qashinka Adkaha ah)

5. Ugu danbayn in Xildhibaanadu ay u guntadaan sidii Deegaanka loo badbaadin lahaa loona daryeeli lahaa Shacab iyo Dawladba.

## 3. WAXYAABAHA LAGA REJEYNAAYEY INAY KASOO BAXAAN

1. In Xildhibaanadu ay soo arkeen deegaanka warna ka hayaan waxa ka socda dhulkii ay indhahooda kusoo arkeen.
2. Qodoba lagu soo kordhiyo Xeerarka ay xildhibaanadu wadeen kuwaas oo ka imaanaya Qaybaha kala duwan ee bulshada.

## 4. DADKA IYO DHULKA BARTILMAAMEEDKA AHAA.

1. Markasta waxaa awooda la saarayey in wax laga ogaado dhulka baadiyaha caadiga ah ee magaalada ka baxsan.

Xildhibaanadu waxaa ay waraysanayeen dadka reer guuraaga ah, kuwa dhuxulaysatada ah,kuwa xoolo raacatada ah iyo kuwa tuulo jooga ah ba.



## 5. QAARKAMIDA JAWAABIHII AY DADKU BIXINAYEEN

**Soolka darara-weyne.**

**Xaliimo Faarax Nuur**

*"waxa noogu daran ee abaarta nagaga xun waa xaalufinta dhirta ,taas hadii aad wax ka qaban kartaan waa inaad wax ka qabataan oo ciidan meeshan yimaadaa xitaa dhuxusha waxaa shida dumarka"*

**Soolka Darara-weyne**

**Ayaanle Ducaale Faarax**

*"Dalkii dhimay baaqibaa ku hadhay baaqigaas waa in loo taliyaa dalku wuxuu u baahanyaahay gurmad dhirtaas badbaadiya geed walba waxaa ku hoos in kabadan kun noole oo yaryar geed waliba waxaa uu ku fadhiyaa dhir farabadan xalka waxaan u arkaa in tikniko dawladu soo dirto oo Darara-weyne loo dhigo taas ayaa lagu xalin karaa, dadkani hadhma eegayaan daaq ma eegayaan way gubayaan uun dhirta"*

**Badweyn**

**Caasha**

*"wadankani waa cidla waa laga guurey kadib markii abaari ka dhacday ,shulkanina wuu nabaad guurey badan badweyn waxaa dhimay oo biyihii yareeyey waa abaar ba'an oo deegaanka haysata, dhuxusha deegaankan lagama shido geedahana lama guro.*

**Xaawa Cali (Gar-adag area)**

*Waxa ugu daran ee abaaraha ka xuni waa dhulka hadii aad wax ka qabankartaan keena ciidan dumarkii ayaa dhuxushii shida xitaa ragaana taas ka masuula, hadii dhirtu dhamaato saxare ayuu dhulku noqonayaa hadaan laba meelood la qaban oo meeli Goof tahay meelina Ooda-dhaadheer tahay dhulkani waa nabaad guurayaa abaarahana taas ayaa ugu wacan.*

Kuwani iyo qaar kale oo badaniba waxaa ay ka mid ahaayeen jawaabaha ay dadku ka bixi nayeen xaalada Deeggaanka.

**Ceeryaanta**

**Oday Saalax Maxamed Muuse**

*Dhuxushu deked ay ka dhoofto ayay leedahay waana BOODACADE meesha layidhaahdo arintan Dawlada ayaa ka seexatay dadkana inta baahidu u geysaa waa yartahay hadii halkaa ciidan dawladu dhigto waa xidhmaysaa waana meesha Dharyo layidhaahdo,nabaadkii dhulka ee xooluhu cuni jireen iyo dhirtii way israacday waxaana lagu dedaa oo lagu gubaa dhirtii yaryarayd ee cawsku ka mid ahaa, waana laba nabaad guur taasi anaga waxaa nala yidhaahdaa CEERYAAN waxaanu ka tirsanahay Gobolka Sanaag waxba nalooma qabto magaalo intaa lee goo bilaa iskuul ahina waa yaab waxaa degan magaaladan ilaa 700 oo qoys oo bilaa iskuul ah.*

**Goof**

**Yuusuf Xuseen Jaamac**

"*dhuxusha deegaankayagu ma jecla degmada ceerigaabo ayaa noogu wacan oo nagu sii deysey dhirta waxaa look ala saaraa geed cawsaad iyo geed abaareed berigihii hore geelu wuxuu ku baxsan jirey geed abaareedka, waanu tagnay ceerigaabo waar bal nasiiya gaadhi iyo ciidan aanu ku ilaalino, markaa waxaan leeyahay waar nimankaa dhuxulaysata ah anagu waanu ka baqnay oo awood bay u baahanyihiin anagu diyaar baanu u nahay in dhuxusha la joojiyo markaa shicib isma indha buuxiyo.*



## 6. WAX YAABIHII LAGALA KULMAY KORMEERKA (CHALLANGES)

Dhulka uu ku fadhiya Gobolka Sanaag oo aad u balaadhnaa awgeed waxaan suura gal ahayn in Xildhibaanadu ay gaadhaan meelo badan oo kamida ah Deegaanka uu ka socdo Dhuxulaysigu .

Isla wakhtigaas ay xildhibaanadu tageen dhulka Gobolka Sanaag ayaa badankiisu wxuu abaar taas oo aanay suura gal ahayn in dadka loo waraysto si waafiya maxaa yeelay dadku way hayaan sanaayeen ama waxaa ay la tacaa mulayeen sidii loo daaq geyn lahaa xoolaha looguna raadin lahaa waxaa ay ku gaadhi lahaayeen roobabka soo socda.

## 7. DHIBAATOOYINKII UGU MIHIIM SANAA EE KA HAYSTEY GOBOLKA SANAAG XAGA DEEGAANKA (priorities)

1. Baabiinta kaymaha
2. Duurjoogta oo si sharci daro ah loo musaafurinayo
3. Qashinka oo aan la habaynayn
4. Nabaad guur
5. Daabiyadaha/tuulooyinka oo soo badanayana keenayana saamayn deegaan
6. Shaqaalaha wasaarada deegaanka oo kuyar ama aan jirin Gobolka Sanaag
7. Dhuxulaysi ba’an oo deegaanka ka socda
8. Seerayaal lakala xidhay dhulkii xooluhu daaqi jireen
9. Wacyi gelin la’aan xaga deegaanka ah
10. Abaaro soo noq noqonaya
11. Jeex jeex yo dhulka kasamaysmaya

## 12. GEBO-GEBEDII SOCDAALKA

Ugu danbayntii waxaa ay xildhibaanadu xaflad balaadhan kaga qayb galeen hotelka Ugbaad ee magaalada Ceerigaabo taas oo ay qaban qaabadeeda sii wadeen qaarkamida shaqaalaha Hay'ada **IRI** iyo Golaha Wakiilada waxaana kulankaas lagaga dooday dhibaatooyinka deegaan ee haysta Gobolka Sanaag iyo sidii lagu xalin lahaa iyo wixii ay reer Sanaag kusoo kordhin lahaayeen xeerarkaa ay xildhibaanadu gacanta ku hayaan abuurkooda.

Presented by:

1. Xil: C/raxmaan yuusuf Cartan
2. Xil: Baar Siciid Faarax
3. Xil: Xaashi Xuseen Caabi
4. Xil: C/qaadir Jaamac Xaamud

Report writer:
Mubarik Farah Warsame
Staff of Somaliland House of Representatives